# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 0931
# THE BOOK OF DANIEL CHAPTER 6:1-14

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **'Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah.'** Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.

Waxaa caaway horey u sii soconaya kitaabkii Daaniyeel oo qayb ka ah kutubta Axdigii Hore. Saddex siyaabood baa noloshii Daanyeel loo qiimeeyaa, waxaana weeye inuua ahaa nin leh ujeeddo, iyo inuu ahaa nin salaadeed iyo inuu ahaa nebi dadka u sii sheega waxyiga imanaya wakhtiga fog. Mid ka mid waxyiyadaas ayuu nebigu leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Daaniyeel 12:4, **".....Kuwo badan baa hore iyo dib u roori doona, aqoontuna waa kordhi doontaa."** Miyaanay haddaba aqoonta banii-aadmigu haatan si xawli badan u sii kordhaynin?

**SONG: REEL—CUT----**

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay dhegaystayaal dhammaadka cutubkii 5aad, waxaanan

soo aragnay in Beelshaasar oo ahaa ninkii labaad ee boqortooyada la dilay. Waxaana boqortooyadii qaatay reer Faaris iyo reer Maaday, oo isla markii xafladdu bilaabatay ayey jeexdintii derbiga hoostiisa maraysay ee laga soo weeciyey webiga Yufraatis dawgeedii ka weeciyeen.

Ciidammadii ayaa markaa soo qaaday tubtii biya-mareenka magaalada, oo soo hoos marayey meel derbiga hoostiisa ahayd, maaddaama aanu ninna malaynaynin in halkaas banii-aadan ka soo geli karo, ayaanu jirin cid ilaalinaysay halkaas. Waxaana la dhabarjebiyey ciidammadii Baabuloon, oo Beelshaasarna waa la dilay, iyadoo ciidammadiisii aanay war iyo wacaal u haynin..

Markii ficilladiisii la miisaamay waxaa u soo baxday inuu dhinto, maxaa wacay heerkii nin taliye ah laga doonayey hoos buu uga dhacay. Haddaba nin heerka Ilaah doonayo gaari kara ma lahan, oo waxaa kitaabku leeyahay, **"...Dhammaan way wada dembaabeen oo gaari waayeen ammaanta Ilaah,"** sida ku qoran Warqaddii reer Rooma 3:23.

Haddaba waxaa xukunkii qabsaday boqor Daariyuus oo ahaa reer Midyaan, wuxuuna ahaa kan u sarreeya boqortooyadan lagu qiimaynayo, markii la eego ekaantii Nebukadnsar arkay, naxaasta ama qalinka. Weerar lama filaan ah ayuu ku soo qaaday boqortooyada, oo isaga iyo ciidamadiisuba way ka adkaadeen reer Baabuloon.

Weliba wakhti mustaqbalka ah ayaa Baabuloon waxay ku dhii doontaa gacmaha Ilaah, waxaana soo dhammaanaya il-baxnimadii dadka sida ku qoran kitaabka muujintii cutubka 18aad. Waxaana intaas ku soo dhammaanaya faalladii ka dambaysay aayadaha

31-30 oo aynu habeen hore idiin akhrinnay. Haatanna dhegaystayaal waxaannu idiin bilaabaynaa:

**CUTUBKA 6AAD EE KITAABKII NEBI DAANYEEL.**

Dhegaystayaal haddaan idiin dul-marno mawduucyada uu ka hadlay ayaa waxay kala yihiin, Jagadii Daanyeel laga siiyey boqortooyadii boqor Daarius oo ahaa reer Maaday ama Midyaan; sirqoolkii loo dhigay Daanyeel; salaaddii Daanyeel; Daanyeel oo libaaxyada godkoodii la geliyey; furashadii Daanyeel; iyo sidii Daanyeel u barwaaqoobay iyo weliba amarkii Daariyus.

Haddaba cutubka 6aad ee kitaabkii Daanyeel ayaa lagu tiriyaa inuu yahay mid ka mid ah cutubyada ugu caansan ee kitaabka, waana qiso aad loo wada garanayo, oo masiixiyiinta dhexdooda laga yaqaan. Myaad weligaa ka fakartay in Daaniyeel hal habeen oo qura uu la jiifsaday libaaxyada, ha yeeshee ka bilaabata mrkii uu toddoba-iyo-toban jirsaday ilaa iyo maalinka maantay ah wuxuu dhex joogay boqortooyo ay maamulayaan boqorro karaahiyo ah.

Haddaba in hal habeen uu libaaxyo la baryo waxaa ka khatarsan inuu noloshiisii ood han dhex joogay boqorro aan Ilaah aqoon. Wuxuu la soo shaqeeyey, boqor Nebukadnesar, Nabonidus, Beelshaasar, Dariyus oo reer Midyaan ahaa iyo Kuuros. Raggaas oo dhan dhammaantood waxay ka yimaadeen quruun aan Ilaah garanaynin.

Daanyeel khatar joogta ah ayuu ku jiray wakhtigaas oo dhan intii uu joogay daarta boqorrada Baabuloon, iyo kuwii reer Maaday iyo reer Faaris. Inkastoo noloshiisu ay halis ku jirtay haddana Ilaah buu boqorradaas hortooda ugu markhaati furi jiray, oo

nolosha kuwo badan oo ka mid ah boqorrdana wuu beddelay, oo Ilaah bay soo raaceen.

Haddaba imminka waxaynu soo gaarnay qayb ka mid ah kitaabka Daanyeel oo khusaysa taariikhda boqortooyadii ka dambaysay reer Baabuloon, oo qaybtan taariikhda ah ee halkan laynoogu sheegayana waxay leedahay asbaab wacan oo ka dambaysa arrinka Haddaba qisadan khaaska ah ee Daanyeel la soo gudboonaatay ayaa sii sheegaysa ama noqonaysa waxyi khuseeya sida Ilaah u daafici doono dadkiisa reer binu Israa'iil dhammaadka wakhtiga--waa marka dunida oo dhan ay dhibaatadu saamayn doonto, waana wakhtiga dhibka weyn oo isaga oo kale aan la arag uu dhulka ka dhici doono.

Cutubkan wuxuu la mid yahay kii saddexaad markaasoo Ilaah si mucjiso leh ku badbaadiyey saddexdii saaxiib ee Daanyeel ee ku dhex jiray dabka. Haddaba su'aal baa ka taagan halkii ay ku maqnaayeen raggii Daanyeel saaxiibbadiis ahaa markii Daanyeel kelidiis loo geeyey libaaxyada, isla sidii su'aashu uga taagnayd halkii Daanyeel ku maqnaa markii saddexdiisii saaxiib foornada ololaysa ee dabka ah lagu tuuray.

Waxaa markaa gunaanadku noqonayaa in sida abbaarta ah sadexdaas saaxiib aanay imminka noolayn ama maaddaama boqortooyadii is-beddeshay aanay wax xil ah haynin. Cutubka saddexaad iyo kan lixaad waxaa ku qoran laba qiso oo Ilaah ku badbaadiyey dadkiisii reer Baabuloon---waana tusaale tilmaamaya sida Ilaah u badbaadin doono muuminiintiisa wakhtiga dhibka weyn hadday ahaan lahayeen reer binu Israa'iil iyo weliba quruumaha.

Waxaa cutubkii saddexaad la adkaynayey sida

cadowtinnimada iyo xasuuqa dadka, cutubkan lixaadna waxaa xoogga la saarayaa sida shayddaanku u nac-weyn yahay iyo xasuuqa uu ku hayo dadka. Farriinta aan kala soo baxayno cutubkan waxay waafaqaysaa tii rasuul Butros inoogu qoray Warqaddiisii kowaad 5:8, markaasoo rasuulku lahaa:

**"Feejignaada oo soo jeeda, waayo, cadowgiinna Ibliiska ahu sida libaax ciyaya ayuu u wareegaa oo uu u doondoonaa cid uu liqo."** Haddaba qof walib dhegaystayaal wuxuu ku nool yahay ama la nool yahay libaaxyo, waxaana libaaxyadu dhooban yihiin dunida, waana duufsashada ama jirrabaadda maalin waliba ina soo food saaraysay, taasoo aynu ku weyn karno qorshihii wanaagsanaa ee nabaadiinada.

Waxaana cabsida, argaggaxa iyo xumaantaba ka dambeeya Shayddaanka, oo waa isaga kan dadka dabinka u dhigaya oo la meeraysanaya siriqda qarsoon. Waa kan sirqoolldada, dibindaabyada iyo jahwareerkaba masuulka ka ah. Haatanse waxaannu idiinka faalaynaynaa dhegaystayaal:

**JAGADA DAANYEEL KA HOOS QABANAYO BOQORTOOYADAN REER MAADAY IYO REER FAARIS.**

Waxaannu markaa haatan idiin bilaabaynaa meeriska cutubka 6aad aayadaha 1-2, baalka 1117 ee kitaabkii Daanyeel oo qayb ka ah kutubka Axdigii Hore. Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Dariyus waxaa la wanaagsanaa inuu boqortooyadiisa u yeelo boqol iyo labaatan amiir, oo boqortooyada oo dhan wada gaadha; oo wuxuu iyagii ka sara mariyey saddex madaxweyne, oo Daanyeel ka mid ahaa; inay amiirradu iyaga la xisaabtamaan, oo aan boqorka khasaare ku dhicin."**

Haddaba ka bilaabata bilowga cutubkan, waxaan mar

kale horey ugu soconaynaa taariikhda. Bqortooyada Baabuloon, oo iyada lagu masaalay inay ahayd madax dahab ah ayaa soo dhammaatay, waxaana soo dhammaaday boqortooyadii mudnaanta kowaad lahayd; sida lagu muujiyey riyadii Nebukadnesar.

Nebukadnesar wuxuu ku riyooday ekaan ama taallo madaxa kore ka ah dahab, gacmaha iyo garbahana ka ah naxaas, caloosha ilaa simahana ah ahmaar, lugahana ka ah bir, cagaha hoosana ah dhoobo iyo biro laysku qasay. Waxaan markaas idiin sheegnay in ekaantu ay u taagnayd boqortooyooyinka dunida, oo madaxeeda kore waxaa matalayey Nebukadnesar iyo boqortooyadiisii reer Baabuloon, naxaastana waxaa ay u taagan tahay reer Maaday iyo reer Faaris.

Taariikhiyan ninkan la yiraahdo Daariyus waa ninkii la oran jiray Dariyus Cyaxareskii labaad marka la eego taariikhda reer Baabuloonkii hore, wuxuuna boqor ahaa laba sannadood oo keliya. Kuuros, oo isagu ahaa boqorkii ku xigay, waxaa dhalay Daariyus walaashiis Mundane iyo nin reer Faaris ama Beershiya ah oo la oran jiray Cambyses.

Sababtaas aawadeed ayaa boqortooyada reer Maaday iyo reer Faaris ay mid ku noqdeen maaddaama Kuuros hooyadii ay ahayd reer Maaday, aabihiisna uu ahaa reer Faaris. Waxaanay iyaguna xukumayeen dunida oo dhan, waa dunidii ilbaxa ahayde. Inkastoo boqortooyadii is-beddeshay haddana lama ilaawin Daanyeel oo waxaa la siiyey jago sarraysa ee uu ka dhex hayey boqortooyadan reer Faaris ee uu hoggaaminayey Darius.

Boqortooyadan mrkii aannu indha-indhayno lama mid ahayn tii Nebukadnesar. Nebukadnesar isaga ayaa u sarreeyey boqortooyadiisa, oo ma lahayn cid isaga

talada la wadaagta. Markaa boqortooyadan karaamadeedu way ka hoosaysaa tii Nebukadnesar maxaa wacay waxaa la magacaabay boqolaal qof oo amiirro ay iyo saddex madax-weyne oo u dhexeeya amiirrada iyo boqorka. Waxay saddexda madaxweyne eegi jireen danta boqorka uu ka leeyahay waddammada amiirradaasu xukumaan.

Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka lixaad ayaannu imminkana eegaynaa aayadda 3aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan hoos ku qoran:

**"Markaasaa Daanyeel laga soocay madaxweynayaashii iyo amiirradii, maxaa yeelay waxaa isaga ku jiray ruux aad u wanaagsan; boqorkiina wuxuu ku fikiray inuu talada boqortooyada oo dhan u dhiibo."**

Daanyeel uguma weynayn kooxda la doortay laakiin weliba waa ugu sarreeyey, waayo wuxuu lahaa shakhsiyad wanaagsan. Boqorkuna wuu ku kalsoonaa isaga oo jagadiisiina waa la sarraysiiyey.

Imminkana waxaannu soo gaarnay maaddada khusaysa:

## SIRQOOLKII LOO DHIGAY DAANYEEL

Haddaan sirqoolka kuwii sharka lahaa ay u dhigeen Daanyeel idiinka akhrinno kitaabka ayaannu imminkana eegaynaa dhegaystayaal aayadda 4aad ee cutubka lixaad waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markaasaa madaxweynayaashii iyo amiirradii waxay doondooneen sabab ay Daanyeel ku dacweeyaan oo xagga boqortooyada ku saabsan; laakiinse way waayeen sabab iyo xumaan toona; maxaa yeelay, isagu wuxuu ahaa aamin, oo qalad iyo xumaan toona lagama helin."**

Markii aynu u fiirsanno aayadahaas kore ayaa waxaa soo baxaysa hal arrin oo hubaal ah, waxaana weeye haddii meel laguu sarraysiiyo, indhaha oo dhan adiga ayey ku soo eegayaan, oo waxaa kacaya dad cadaawe

kuugu ah oo doonaya inay jagada iyo awooddaba kaa qaadaan. Mar walibana waxay doondoonayaan inay ogaadaan meelaha aad ka jilicsan tahay si markaa ay weerar ugu soo ekeeyaan meel waliba oo ay arkaan inaad ka nugushahay. Imminka Daanyeel wuxuu ku noolaa nolol hufan oo hagaagsan, oo laga malaysto nin waliba oo Ilaah daacad u ah, oo waxay ka waayeen meel laga soo galo, hadday noqon lahayd taariikhdiisii hore iyo weliba tan uu lahaa markaas iyada ah. Wuxuu ahaa nin hufan oo ceeb-ka-saliin ah. Waxaa aalaaba qolyaha siyaasadda lagu yaqaan inay baadi-goobaan ceebta kan ay is-hayaan, laakiin qofka Ilaah ka cabsada waa inuu eed la'aado, oo waliba ee lagu soo oogo dhammaadkeedu wuxuu noqdaa been.Rasuul Bawlos oo la hadlaya rumaystayaashii reer Filiboy ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran 2:15, markaasoo uu lahaa rasuulku, **"inaad ceeb iyo eed la'aataan, idinkoo ah carruurtii Ilaah oo aan iin lahayn, oo ku dhex jira qarni qalloocan oo qallafsan, kuwaas oo aad uga dhex muuqataan sida nuurar dunida ku dhex jira."**

Mar kalena wuxuu leeyahay isagoo hoga-tusaalaynaya ahmiyadda ay u leedahay muuniniinta inay daacad ahaadaan, sida ku qoran kitaabka Falimaha rasuullda 24:16, waxaana qoran:

**"Tan ayaan ku dadaalayaa inaan had iyo goorba qabo qalbi aan xumaan u keenin xagga Ilaah iyo xagga dadkaba."** Mid waliba oo masiixi ah sidaas ayaa laga doonayaa. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal ayaannu imminkana eegaynaa kitaabkii Daanyeel 6:5, waxaana qorniinku leeyahay sidatan: **"Markaasay nimankaasu waxay isku yidhaahdeen, sabab ku heli mayno Daanyeelkan, haddaynaan ku helin xagga**

**sharciga ku saabsan Ilaahiisa."**

Haatan waxay soo saareen in Daanyeel aanu caadi ahayn, oo uu yahay nin sumcaddiisu sarrayso. Waxaase ay garteen halka ay iinta ka heli karaan inay haayd rumaysadkiisa Ilaah. Waxaa la garanayey noloshiisii hufnayd oo ku dhisnayd salaadda.

Waxay markaa imminka doondoonayaan qaab ay boqorka iyo ninkan derajada sare la siiyey ee Daanyeel ah ay isaga hor yimaadaan. Haddaan horey idiinku sii wadno taariikhda ayaannu ku soo noqonaynaa meeriska cutubka 6aad, waxaanan idiinka akhriyeynaa qisada aayadaha 6-7, waxaana qoran sidatan:

**"Markaasaa madaxeynayaashii iyo amiirradii la shireen boqorkii, oo waxay ku yidhaahdeen, Boqor Daariyusow, weligaaba noolow. Madaxweynayaashii boqortooyada oo dhan, iyo taliyayaashii, iyo amiirradii, iyo waaniyayaashii, iyo saraakiishii, waxay ku tashadeen inay dhisaan qaynuun boqornimo iyo amar leh, ku alla kii intii soddon maalmood ah wax weyddiista Ilaah kale ama nin, adiga mooyaane, Boqorow, waa in lagu rido bohosha libaaxyada."**

Sirqoolka ay dhigayaan ama maleegayaan nimankan waa mid halis ah oo weliba dahsoon. Boqorku wuxuu ahaa nin wanaagsan, oo waxaa kaloo u markhaati furaya boqorka taariikhda sooyaalka ah ee laga helo kutubka kale ee aan Baybalka ka midka ahayn. Waxay nimankanu soo heleen halkii Daanyeel ka nuglaa, oo waxay asiibeen taladii gacan-gelinta Daanyeel.

Daanyeel wuxuu ahaa nin xagga rumaysadka ku gaamuray oo waxba ku doorsan maayo Ilaah. Ma wanaagsana markaa inaan ka gaabinno doorka Ilaah ka doonayo ninka muuminka ah. Welibana maahan inaan la dhacno bogaadinta ka imanaysa dadka qaarkii, iyagoo inagu

oranaya **"War waxaad tahay nin hal-adayg leh oo Masiixa ku gaamuray."**
Hawl kastoo aad masiixa ama dadkaaga u hayso ayaa la doonayaa inaadan ku samaynin faan dadka kale ka imanaya. Waxaad wax waliba u samaynaysaa Ilaah dartii, laakiin maahan in hambalyo iyo bogaadin aad ku shaqayso saaxiibkayaga masiixiga ahow.
Haddaba nimankan hoggaamiyayaasha ahaa waxay hor yimaadeen boqorkii, oo ammaan iyo bogaadin iyo hadallo uu ku farxo ayey kula hadleen oo waxay ogolaysiiyeen in taladooda sharci laga dhigo si kii ku xad-gudbaaba loo dilo.
Waxay isagii ka dhigeen sida Ilaah oo kale, oo waa in isaga oo keliya la baryo mudadaas soddonka maalmood ah. Haddaan horey idiinku sii wadno qisada kitaabak ayaannu imminka eegaynaa 6:8-9, baalka 1117 ee Axdigii Hore, waxaana qoran sidatan:
**"Haddaba, Boqorow, amarka dhis, oo qorniinka saxiix si uusan u beddelmin, sida sharciga reer Maaday iyo reer Faaris uusan u beddelmin oo kale. Sidaas daraaddeed boqor Daariyus waa saxiixay qorniinkii iyo amarkii."**
Boqor Daariyus imminka wuxuu u licay codsigoodii oo dabcan isaga lagu weynaynayey, waxaana amarkii saxiixay boqorka oo welibana isma beddeli karo. Waxaana weeye in intii soddon maalmood ah aan cid kale la baryin, boqorka mooyaane.
Amarkan la saxiixay cid beddeli karta ma lahan oo xitaa boqorka ayaa mar haddii la meel-mariyo aan hor-joogsan karin. Maaddaama sirqoolka looga soo hor-jeedo Daanyeel, ayaa waxaa cad inay sii faquuqayaan Daanyeel oo ay ogsoon yihiin inaanu banii-aadan caabudin. Bal imminkana aynu eegno

maaddada kale oo khusaysa:

**SALAADDII DAANYEEL ILAAH LA HOR YIMID.**

Si bal aynu wax kaga ogaanno tabaabushaha Daanyeel ee ku aaddan amarkan, ayaannu imminka la soo kala baxaynaa baalka 1117 ee Axdigii hore, Kitaabkii Daanyeel 6:10, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Daanyeelna markuu ogaaday in qorniinkii la saxiixay ayuu guriisii galay, haddaba daaqadiihii qolkiisii oo xagga Yeruusaalem u jeeday way furnaayeen, oo saddex jeer buu maalintiiba jilbo joogsan jiray oo tukan jiray, oo Ilaahiisa ku mahadnaqi jiray, siduu hore u yeeli jiray."**

Bal eeg sida Daanyeel uga jawaabay sharcigii soo baxay. Daaqaddiisii ku sii jeedday Yeruusaalem ayuu furay, oo wuxuu sii watay salaaddiisii uu Ilaah ku baryi jiray maalin waliba. Isma uusan waalin, oo hadallo cay ahna afkiisa lagama helin. Wixii uus amayn jiray un buu sii watay, oo albaabada iyo dariishadahana ma xiranin isagoo ka baqaya in la soo basaaso. Wuxuu wejigiisa u jeediyey dhinaca Yeruusaalem, oo qalbigiisuna halkaas ayuu jiray, oo ma doonaynin inuu qalbigiisa ka soo jeediyo Ilaah. Reer binu Israa'iil markii maxbuusnimada loo watay nin waliba wuxuu wejigiisa u soo jeedin jiray dhanka Yeruusaalem, oo dadkii Ilaah ee xilligaas noolaa waxay wejiyadooda u sii jeedin jireen dhanka Yeruusaalem.

Ha yeeshee maanta meelna wejiyada looma sii jeediyo, waayo masiixu wuxuu leeyahay sida ku qoran Iniilka sida Yooxanaa uq oray 4:21-24 sidatan:

**"Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Naag yahay, i rumee, saacaddu waa imanaysaa markii aydnaan**

**Aabbaha ku caabudi doonin ama buurtan ama Yeruusaalem midnaba."**

Maaddaama arrinka laynoo bayaamiyey ayaannu imminka sii soconaynaa oo waxaannu la soo kala baxaynaa baalka 1117 ee Axdigii Hore, ktiaabka Daanyeel 6:11, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markaasay nimankii isu soo shireen, oo waxay heleen Daanyeel oo wax weyddiisanaya oo baryaya Ilaahiisa."**

Bacdamaa ay raggani ilaalaysanayeen Daanyeel, ayaanay ku adkaan inay helaan isagoo Ilaahiisa caabudaya, oo horeyba way u garanayeen inaanu aqbalaynin amar isaga ka hor joogsanaya inuu Ilaah caabudo. Haddaan horey idiinku sii wdo ayaannu imminkana eegaynaa kitaabkii Daanyeel 6:12-14, baalka 1118 ee Axdigii Hore, waxaana qoran sidatan:

**"Markaasay u soo dhwaadeen, oo waxay boqorka hortiisa kaga hadleen wax ku saabsan amarkii boqorka, oo wsxay yidhaahdeen, Miyaadan saxiixin amar leh, Ku alla kii , intii soddon maalmood ah wax weyddiista Ilaah kale ama nin, adiga mooyaane, waa in lagu rido bohosha libaaxyada? Boqorkiina waa u jawaabay oo ku yidhi, Taasu waa run, sida sharciga reer Maaday iyo reer Faaris ku qoran oo aan beddelmi karin.**

**Markaasay jawaabeen oo waxay boqorkii hortiisa ka yidhaahdeen, Boqorow, Daanyeelkii ka mid ahaa kuwii Yuhuuddah laga soo dhacay, dan kama leh adiga iyo amarkii aad saxiixday toona, laakiinse saddex jeer buu maalin walba Ilaahiisa wax weyddiistaa. Markaasaa boqorkii markuu hadalkaas maqlay ayuu aad uga xumaaday, oo isku dayey inuu Daanyeel samato bixiyo; oo ilaa qorraxdu ka dhacday ayuu**

**hawshoonayay inuu isaga badbaadiyo."**

**SONG: REEL----CUT------**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin